Siyaasadda JIH- Su’aalo wayddiinta, Fatishaadda iyo Xiridda Ardayga

Dugsiyada Dadweynaha Denver waxay raadinayaan in ay suurtagaliyaan jawiga dugsiyada oo sahlaya waxbarashada eena ilaalinaya badbaadada iyo nolol-wanaagga shaqaalaha iyo ardayda. Si loogu guulaysto yoolkan, waxaa laga yaabaa in ay daruuri u tahay hawlwadeenada dugsiga in ay fatishaan shaqsiga iyo ama hantida shaqsi ahaaneed ee ardayga iyo in ay gacanta ku dhigaan hanti kasta ee loo arko in waxyeellaynayso ama dhaawacayso badbaadada iyo nolol-wanaaga ardayda iyo shaqaalaha. Maamulka dugisga waa in uu si buuxda wadashaqayn ugala yeeshaa wakaaladaha sharci fulinta deegaanka marka la tixgalinayo in wax laga fatisho hantida dugsiga iyo dhismeyaasha dugsiga marka baaritaanada iyo fatishaadda la xiriirta daroogada ama dambiyada kale ay socdaan.

Fatishaadda ay Fuliyaan hawlwadeenada Dugsiga:

Maamulaha ama mas’uul xafiiseedka dugsiga ee sida suurtagalka ah ugu shakiya in fatishaadda ay soo saarayso caddeyn ah in ardayga uu jabiyay siyaasadda dugsiga ama sharciga wuxuu sameyn karaa fatishaad. Marka sabab suurtagal ah ee fatishaad ay jirto, shaqaalaha dugsiga wuxuu fatishi karaa ardayga iyo/ama hantida shaqsi ahaaneed ee ardayga inta uu joogo dhismeyaasha dugsiga ama inta lagu guda jiro waxqabadka dugsiga wuxuuna gacanta ku dhigi karaa walxo kasta ee sharci-daro ah, la oggoleen ama koontrabaan ah sida lagu qeexay siyaasadda.

Fatishaad kasta ee uu fuliyo mas'uul xafiiseedka dugsiga waa in ay tixgelisaa kali ahaanshaha ardayga waa in aysan xad-dhaaf badnayn marka loo eego daruuri ahaanta, ayadoo la tixgalinayo da’da iyo lab/dheddig ahaanta ardayga iyo dabiiciga xadgudubka laga shakiyay.

Fatishaadda Hantida Dugsiga:

Dhammaan sanduuqyada yaryar, miisaska iyo goobaha kale ee wax lagu kaydsado ee ay ardayda isticmaasho ee dhammaan Dugsiyada Dadweynaha Denver waxaa iska leh Degmada, dhammaana waxay hoos imaanayaan xukunka maamuleyaasha dugsiyada kala duwan. Waxaa siidheer,in dhammaan qufulada uu ardayda siiyo maamulaha dugsiga ama qofka ku magacaaban, asalka furaha liisaska qufulka ama lambarada lagu furo sanduuqyada yaryar waxaa haya maamulaha ama qofka asaga u magacaabay. Hantida dugsiga ee loo bixiyay isticmaalka ardayda waxay ku khasban yihiin baaritaan, nadiifin, dayactir iyo fatishaad ayada oo la raacayo siyaasaddan.

Ardayda waa in ay qaadaan mas’uuliyadda buuxda ee amniga sanduuqyadooda yaryar ama goobaha kale ee kaydinta sida habka uu ansixiyay maamulka. Ardayda waa in loo qabsadaa mas’uuliyadda wax kastoo ku jira miisaska, sanduuqyada yaryar iyo goobaha kale ee kaydinta ee ayaga dugsiga u qoondeeyay.

Maamulaha ama qofka loo magacaabay wuxuu fatishi karaa miiska dugsiga, sanduuqa yar ama goob kaydin kastoo kale ee dugsiga ah wakhti kasta, marka uu jiro shaki suurtagal ah ama la'aantiisa iyo waxyaabaha ku jira marka ay jiraan sababo suurtagal ah ee keeni kara fatishaad. Waxyaabaha ku jira waa in ay ka mid noqdaan walxaha sida boorso-gacmeedyo, boorsooyinka lacagta, boorsooyinka dhabarka la saarto iyo jeebabka dharka. Mas’uuliyiinta dugsiga waxay sidoo kale fatishi karaan gawaarida la dhigay hantida maguurtada ah ee dugsiga haddii uu jiro shaki suurtagal ah. Markastoo ay suurtagal tahay, shaqsi kale waa in uu joogaa si uu uga markhaati kaco fatishaadda.

Fatishaadda Shaqsiga Ardayga ah:

Maamulaha ama qofka loo magacaabay wuxuu fatishi karaa shaqsiga ardayga ah haddii mas’uulka dugsiga uu si macquul ah uga shakiyay in ardayga uu haysto koontrabaan ama in fatishaadda lagu soosaari karo caddaynta jabinta sharciga, siyaasadaha degmada dugsiga, ama qaanuunada dugsiga.

Fatishaadda shaqsiga waa in lagu xaddido jeebabka ardayga, walxo kasta ee ardayga haysta sida boorso-gacmeedka ama shandadda, iyo/ama "faishaada qofka" ee dharka dibadda laga xirto. Wax fatishaad qaawin, oo loola jeedo fatishaadda u baahan saaritaanka shaatiyada, canbuurada, ama surweelada, waa in aysan sameynin shaqaalaha degmada.

Fatishaadda waa in lagu fuliyaa meel aysan joogan ardayda kale iyo sida kali ahaanshaha ee ugu suurtagalsan. Isku-day waa in la sameeyaa sida ay fatishaadda u sameeyaan shaqsi shaqaalaha ah oo ay isku jinsi yihiin ayadoo uu joogo markhaati qaangaar ah oo labaad.

Walxaha Qabashadooda:

Wax kastoo la helo inta lagu guda jiro fatishaadda ay fuliyeen mas'uuliyiinta dugsiga oo caddayn u ah jabinta sharciga ama siyaasadda degmada ama qaanuunka dugsiga ama taasi uu joogitaankeeda ay soo bandhigayso halis waxyeellayn jir ahaaneed degdeg ah, ayaa gacanta lagu dhigi karaa.

Su’aalo Wayddiinta Mas’uuliyiinta Dugsiga:

Ardayda waxaa laga yaabaa in ay ku khasbadanaadaan in ay su'aalo wayddiiyaan shaqaalaha Degmada wakhti kasta. Ardayga la aaminsan yahay in uu falay dambi kaasi oo ku waajibta dugsi ka cayrin waa in aan laga dalban bayaan qoran oo khuseeya dambiga ilaa waalidkiisa ama waalidkeeda ama mas'uulka uu joogo ama isku-day macquul ah laga sameeyo oo lagula xiriirayo waalidka ama mas'uulka ayadoo la wacayo taleefoon lambarada ay dugsi siiyeen dugsiga waalidka. mas'uulka, ama ardayga.

Qeexitaano:

"Shakiga macquul" wuxuu ku saleysan yahay xaqiiqayooyinka ay bixiyeen warsheeg lagu kalsoon yahay ama daawasho shaqsi ahaaneed ee keenay mas'uulka dugsiga in la aamino, oo ku saleysan khiradda shaqsi ahaaneed, ee fatisha shaqsi gaar ah, goobta ama waxa keenaya soosaaritaanka caddeyn xadgudub siyaasadda Guddiga, qaanuunka dugsiga ama sharciyada dowladda dhexe ama gobolka.

“Koontrabaan" wuxuu ka kooban yahay dhammaan maadooyinka ama walxaha laga mamnuucay siyaasadda Guddiga ama sharciga dowladda dhexe ama gobolka oo ay ka mid tahay balse aanan ku xaddidnayn daroogooyinka, aalkolo, qoryo, mindiyo, hubabka kale ama aaladaha dabka dhaliya.

Fatishaadda iyo Gacan Ku Dhigidda Sharci Fulinta:

Maamulaha ama qofka loo magacaabay waxay codsan karaan in fatishaadda dhismeyaasha dugsiga uu fuliya sarkaalka sharci fulinta. Marka saraakiisha sharci fulinta ay fuliyaan fatishaad, shaqaalaha dugsiga waa in ay ka fogaadaan caawinta ama haddii kale ka qaybqaadashada fatishaadda haddii amarka tooska ah ee sarkaalka sharci fulinta hoos imaanaya mooyaane.

Haddii hawlwadeenada sharci fulinta ay ka raadiyaan oggolaansho mas’uuliyiinta dugsiga si ay u fatishaan ardayga ama hantida ardayga, mas’uuliyiinta dugsiga waa in ay wayddiistaan booliska in ay soosaaraan u banaynta fatishaad sharci ahaan la isticmaali karo kahor inta fatishaadda aan la meel-marinin haddii hawlwadeenka sharci fulinta kula taliyo maamulaha in:

1. Uu jiro oggolaansho aan khasab ku ahayn ardayga;

2. Uu jiro sabab suuroobi karta iyo duruufo qaadanaya wakhtiga lagu helayo u banaynta fatishaadda ay niyad-jabinayso ujeeddada fatishaadda; ama

3. Fatishaadda ay tahay dhacdo xiritaan waxayna ku xadaysan tahay shaqsiga iyo agaagaarka u dhow.

Su'aalo Wayddiinta Booliska:

Marka mas'uuliyiinta sharci fulinta ay codsadaan fasax ay ku waydiinayaa su'aal ardayga (ardayda) looga shakiyay in ay jabiyeen sharciga ama siyaasadda Guddiga marka ardaygaasi uu joogo dugsiga ama uu ka qaybqaadanayo waxqabadyada dugsiga, maamulaha ama qofka loo magacaabay waa in uu joogo. Haddii ardayga ay da'diisu ka yar tahay 18 sano, waalidka/mas'uulka ardayga waa in uu joogo haddii dhalaanka xor uu yahay mooyaane sida eraygaasi loogu qeexay sharciga gobolka.

Waa in dadaal la sameeyaa si loo dhimo feejignaanta u soo jiiday ardayga in su'aalo la wayddiiyo ayadoo loo qaadayo su'aalo wayddiinta si khaas ah oo leh carqaladayn yar oo ku imaanasa jadwalka sida ugu suurtagalsan.

Xabsi ku haynta/Xiridda:

Markastoo xabsi ku haynta iyo/ama xiritaanka booliska ay timaado, maamulaha dugsiga waa in uu codsado in dhammaan habraaca ilaalinta sharci ahaan loo baahan yahay in la dhawro. Maamulaha waa in uu u siideeyo ardayga sarkaalka booliska waxaana laga doonayaa in uu ogeysiiyo waalidiinta ardayga talaabada. Sarkaalka booliska waa in uu ogeysiiyo maamulaha sababta gaarka ah ee ardayga loogu ka xaynayo xabsi ku haynta aan joogtada ahayn. Maamulaha waa in uu kula taliyaa waalidiinta ardayga sababaha la sheegay waana in ay ku sheegaan xogtan qoraalka rasmiga ah ee ogeysiiska. Hal nuqul ee ah ogeysiiska waa in lagu sii hayo faylka dugsiga hal nuqulna waa in loo diro waalidiinta.

La ansixiyay 15 Abriil, 1971
La muraajaceeyay 1 Febraayo, 1983
La muraajaceeyay 15 Febraayo, 2001
La muraajaceeyay 21 Oktoobar, 2004

TIXRAACA SHARCIGA AH.: C.R.S. 19-2-201 et seq.
C.R.S. 19-2-511 at seq.
C.R.S. 22-32-109.1(2)(a)(VIII) (siyaasadda loo baahan yahay sida qayb ka mid ah qorshaha dugsiga ee badbaadsan)
C.R.S. 22-33-106.3

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO.: JK, Anshaxa Ardayga, iyo xeerar hoosaadka JLIB, Taxadiridyada Cayrinta Ardayga